Ministry of Security and Justice

Taariikh 23-05-2016
Mowduuca Codsiga magangelyada ee Nederland

Mudane iyo Marwo,

Waxaad rabtaa in aad magangelyo ka codsato Nederland. Waan ogahay waxaad rabtaa sida ugu dhaqsiyaha badanay kuu cad yahay mustaqbalkaaga. Warqadan waxaan kuugu sheegayaa waxa aad filan kartid. Hadda qaxooti badan ayaan soo gala Nederland. Sidaa daraadeed xerooyinka aad ayay u buuxaan, mana aha xerooyinka sidii la rabay waqtiga la sugayana aad bay u dheer tahay

Sugitaan dheer
Waqtiga la sugayo ka hor inta aanu bilaabmin dacwadaada hadda waxaa uu qiyaastii gaarayaa todobo bilood. Markaa ka dib ayay IND baaraysa in laguu ogolyahay in aad Nederland joogto. Inta uu qaadanayo baaritaankaasi lama sii sheegi karo. Waa uu gaaban karaa, laakiin waxaa kaloo dhici karta in uu bilooyin qaato. Qaxooti badan oo Nederland soo gelayo darteed ayaa waqtiga ay IND go'aan ku gaari karto loo kordhiyey oo laga dhigay 15 bilood, welina ay suurtagal tahay in mudadaasi lagu kordhiyo seddax bilood haddii sidaa loo baahdo si loo gaaro go'aan fiican. Kuwani waa waqtiyada ugu badan: dadaalka IND waxaa loogu tala galay in si deg deg ah go'aan loo gaaro. Haddii aad ka hor 10 febraayo 2016 isku dhiibtey IND, waxaad u qaadanaysaa in IND ku dadaalayso lix bilood gudahood in ay go'aan ku gaarto ka dib bilowga baaritaanka IND ee halkaan kore lagu soo sheegay.

Wadamada nabada ah
Waxaa lagu siinayaa magangeliyo Nederland haddii aad xaq u yeelato. Hadey cadahay inaadan xaq u laheyn magangalyo, si dhaqso leh ayaa lagugu diidayaa. Haddii aad ka timid wadan nabad ah codsigaada si dhaqso leh ayaa loo xalinayaa laguguna diidayaa. Wadamada nabada ah waxaa ka mid ah Albaaniya, Bosniya hersogofiina, Kosofo, Seerbiya, liiska qoraalkaasi oo dhan waxaad kala xiriireysaa Bogga internetka IND (https://ind.nl/particulier/asiel/Paginas/Veilige-landen0428-2716.aspx).

Haddii wadamadaas oo kale ka timid sidaana lagugu diido, xaq uma lihid meel aad joogetid waxaa kugu waajib ah inaad si dhaqso leh wadankaada aad ka soo jeedo dib ugu noqotid. Hayadda dib u celinta (DT&V) ayaa kugu hogaaminaaysa go'aankan diidmada ah iyo sidookale mamnuuca safarku soo gelida oo laba sano dalal badan oo yurub ah.

Diiwaangelinta wadan kaloo Europe ah
Ma iska soo diiwaangelisey mar hore wadan kaloo europe ah adigoo magangelyo doonaya? Markaa wadankaas ayaan sida caadi ah ka mas'uul ah in uu codsigaaga magangelyada ah ka howlgalo. Nederland sida ugu dhaqsiyaha badan ayay dib kuugu celinaysaa wadankaasi reer Europe ah. Haddii aadan rabin in aad sugto, la xiriir markaa hay'ada DT&V.

Bixid ama joogid
Haddii laguu ogol yahay joogitaan, waxaa lagu siinayaa sharci qaxootinimo ku meel gaar ah. Hadaan laguu ogolaan joogitaan waa in aad si deg deg ah Nederland uga baxdaa. Adiga ayaa ka mas'uul ka ah bixitaankaaga waxaase kaa

caawini kara DT&V. xataa haddii aad go'aansatay in aad baxdo, waad la xiriiri kartaa DT&V.

Information Department

Date
23 May 2016

Our reference
.

Gargaar aan sidii la rabay ahayn
Nederland way ku yar yihiin meel ay dadka qaxootiga ka degaan xerooyinka soo dhoweynta. Qaxooti badan ayaa sidaa daraadeed lagu soo dhoweyaa meelo (si ku meel gaar ah) deg deg lagu dhisay oo aan adeegyada u dhamayn. Waa suurtgal in marar badan laguu bedelo xero kale.

Gargaarka oo aad wax ka bixiso
Haddii aad leedahay hanti ama dakhli, markaa waad ku khasban tahay in aad soo sheegto. Waa suurtagal in qeyb ka mid ah hantidaasi bixiso si aad wax ugu kabto kharashka gargaarkaaga (iyo kan qoyskaaga)

Deegaan
Haddii aad leedahay sharci qaxootinimo ah, muddo dheer ayay beryahan qaadata inta guri lagaaga helayo. Waxaa jira guryo yaraan dadkoo dhan khuseya. Haddii guri banaan la helo, waxaa gurigaasi uu noqon karaa guri kontainar ah ama xafiisyo guryo laga dhigey. Waa suurtagal in aad halkaasi muddo dheer iyo dad kalena kula noolaato.

Isu keenida qoyska
Qaxooti badan ayaa ka soo tagay qoyskooda. Waxaad codsi gudbin kartaa oo qoyskaaga laguugu keenayo keli yah haddii aad haysato sharci qaxootinimo ah. Lama sii sheegi karo si la hubo in qoyskaaga la ogol yahay in laguu keeno. Codsi tiro badan darteed ayuu muddo dheer u qaadan kartaa inta aad jawaab cad ka helayso arinkan oo ay qoyskaaga dhab ahaantii Nederland u keensan karto. Hadda waqtiga sida sharciga uu qabo ee ay IND gudahiisa go'aan ay tahay in ay ka gaarto codsiga qoyska laysu keenayo waa lix bilood. Taa macnaheedu waa marka kuli laysku daro in ka badan laba sano ayay qaadan kartaa inta qoyskaaga Nederland ay kuugu yimaadaan, taasina ay ku xiran tahay xaaladaada gaarka ah.

Waa dareensanahay in fariitan aanay ahayn mid fiican, laakiin waxay aniga ila noqotay muhiim in aan runta kuugu wargeliyo.

Wada shaqayn wacan

Dr. K.H.D.M. Dijkhoff
Wasiir ku xigeenka Amaniga iyo Cadaalada

Macluumaad dheeri ah waxaad ka helaysaa:
www.ind.nl
www.coa.nl
www.dienstterugkeerenvertrek.nl
www.iom-nederland.nl

[Somalisch]